# XEER MADAXWEYNE LAM. RSLP/D-1.131/95
# XEER NIDAAMIYAHA CIIDANKA BOLIISKA SOMALILAND
(Police Regulation)

*Markuu Arkey:* *Xeerka dhismaha Ciidanka Boliiska Lambarkiisu yahay 54GW.*

*Markuu arkey:* *Qod. 8aad xeerka lam. 54 ee dhismaha ciidanka Boliiska: oo U xilsaaraya xukuumadda soo saaritaanka Xeer-nidaamiyahan.*

*Markuu dhegeystay:* *soo jeedintii Wasiirka Arrimaha Gudaha*

*Markuu Tixgeliyey:* *Guddoonkii Golaha Wasiirada*

## *W U X U U XEERIYEY:*

## QAYBTA 1aad ERAY BIXINTA IYO DHISMAHA

*Qodobka 1 (Erey bixin)*

*Madaxweyne:-* *Madaxweynaha waxaa loola jeeda Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland.*

*Wasiir:* *Wasiir waxaa loola jeedaa Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Gudaha.*

*Taliyaha Ciidanka:* *Taliyaha Ciidanka waxaa loola jeedaa Taliyaha Ciidanka Boliiska.*

*Duqa Magaalada:-* *Waxaa loola jeedaa xubin koowaad ee Hoggaaminta Nabadgelyada, Siyaasadda iyo Maamulka, ahna Guddoomiyaha Golaha degmada.*

*S a r k a a l:-* *Sarkaal waxaa loola jeedaa marka sharcigan la fiirinayo waxna aan loo dhimin Sharciyo kale, xubin ka tirsan Ciidanka Boliiska Derejadiisuna gaadhay Xidigle iyo wixii ka sareeya.*

*Kormeere:-* *Kormeer waxaa loola jeedaa xubin ka tirsan Ciidanka Boliiska ee derejadiisu tahay K/kowaad ilaa K/S.*

*S/X i g e e n:-* *Sarkaal Xigeen waxaa loola jeedaa Xubin Ciidanka ka tirsan oo Derejadiisu tahay L/Alifle iyo Saddex Alifle.*

*A s k a r i:-* *Askari waxaa loola jeedaa Xubin ka tirsan Ciidanka Boliiska oo ka bilaabanta Layli Askari ilaa Alifle.*

**Mudnaan:-** *Kala horraynta xubnaha ciidanka "Seniortiy"*

**Mutaysi:-** *Kasbashada dallaccaadeed ama u garashadeeda ay xubintu istaahisho "Merit"*

**Laalid:-** *Ka joojin shaqada si ku- meel gaadh ahaan "Suspension"*

**U Qalan:-** *Ku haboonaanta, u hislaanshaha ama u aqoonsiga tilmaanta qofka laga bixinayo ama laga doonayo.*

*Qodobka 2(Dhismaha Ciidanka Boliiska)*

*Ciidanka Boliisku waa qayb ka mid ah Ciidamada Qalabka sida ee Jamhuuriyadda JSL ku meel gaadh ahaan. Madaxweynaha JSL waa Taliyaha Guud ee Ciidamada JSL.*

*2. Ciidanka Boliisku wuxuu si toos ah u hoos imanayaa dhisme ahaan, maamul ahaan iyo markuu shaqadiisa caadiga ah hayo Wasaaradda Arrimaha Gudaha.*

*3. Qaab dhismeedka Ciidanka Boliisku wuxuu ku salaysan yahay mabda'a dimuqraadiyada ee baahinta Maamulka Dalka.*

*Qaybta 2aad.*

*Magacaabidda, Qorista iyo shaqada Ciidanka Boliiska.*

*Qodobka 3 (Taliyaha Ciidanka Boliiska iyo Taliye Xigeenka.*

*Taliyaha Ciidanka Boliiska waxa laga dhex xulanayaa Saraakiisha sare ee Cilmiga Boliiska aqoonta u leh, waxaana lagu macaabayaa Xeer-Madaxweyne iyadoo uu soo jeedinayo Wasiirka Arrimaha Gudaha.*

*2. Taliye Xigeenka Ciidanka waxaa laga xulanayaa saraakiisha sare ee Cilmiga Boliiska aqoonta u leh, waxaana lagu magacaabayaa Xeer-madaxweyne, iyadoo uu sidaas soo jeediyey Wasiirka Arrimaha Guduhu, lana dhegeystay Taliyaha Ciidanka Boliiska.*

*Qodobka 4(Maqaamka Xubnaha Ciidanka)(Status).*

*Xubin walba maqaamkiisa waxa xadidaaya waajibkaadka iyo Xuquuqda ay leedahay Derejadiisa, waxay ka bilaabmeysaa Siinta Rasmiga ah ee Derejadaas, waxayna ku dhamanaysaa lumista Derejadaas.*

*2. Xubnaha Ciidanka Boliisku waxay u qaybsamaan kuwo hawsha haya iyo xubno ka tagey oo kayd ah.*

*3. Xubnaha hawsha haya waxaa qabanaya Shuruudaha Shaqada Boliiska u degsan, haddii lagu dhawaaqo dagaal ama xaalad deg deg ah Xubnihii shaqada ka tagey dib ayaa loogu soo celin karaa.*

**Qodobka 5(Saraakiisha Ciidanka Boliiska)**

1. Meelaha ka banaanaada kutalagalka Saraakiisha Ciidanka waxaa laga buuxinayaa Xubnaha Ciidanka Boliiska ama haddii kale oo loo baahdo Qoris ikhtiyaari ah oo Salka ku haya tartan Dadkoo dhan lu furan oo uu ku dhawaago Wasiirku, marka uu sidaas soo jeediyey Taliyaha Ciidanku iyadoon la dhaafayn Xadka ku talogalka.

2. Qorista waxaa loo samaynayaa heer Qaran ama heer Deegaan hadba meesha looga baahanyahay.

3. Dadka soo doonanaya waa inay buuxiyaan Shuruudaha loo cayimay.

4. Derejada Sarkaal waxaa lagu bixinayaa Xeer-Madaxweyne marka u soo jeediyo Taliyaha Ciidanku.

**Qodobka 6(Kormeerayaashaa Ciidanka)**

1. Kormeerayaasha Ciidanka Boliiska waxaa laga xulanayaa saraakiil-xigeenada hawsha Ciidanka haya, waxaa kaloo laga xulan karaa Muwaadiniinta, iyadoo lagu xulanayo Shuruudaha la cayimay oo uu soo saaraya Taliyaha Ciidanka Boliisku.

2. Derejada Kormeere waxaa bixinaya taliyaha Ciidanka markay heer qaran tahay, sidoo kale Duqa magaalada markay tahay heer deegaan, iyadoo laga gudbayn Xadka kutalagalka.

3. Saraakiil-xigeenada loo xulanaayo kormeerayaal waa inay lahaadaan shuruudaha soo socda:-

B- Waa inuu ugu yaraan hayaa Shaqada laba sanno;
T- Waa inuu akhriyi karaa Qorina karaa Farta Soomaaliga;
J- Leeyahay Asluub Fiican;
X- Jidh ahaan iyo Maskax ahaanba fayowyahay;
D- leeyahay awood fiican oo hogaamineed;

4. Dalacaadda gaar haaneed kuma xidhmayso Qorista iyo akhriska farta Soomaaliga.
5. Taliyaha Ciidanku wuxuu awood u leeyahay hadday ugu muuqato lagama maarmaan isagoo eegaya danta guud ee Ciidanka in Shuruudaha kor ku xusan wax ku daro, ka dhimo ama wax ka beddelo.

**Qodobka 7(Saraakiil Xigeenka**

1. S/Xigeenka Ciidanka Boliiska waxaa laga xulanayaa Askarta Ciidanka ee hawsha haysa, waxaa kaloo laga xulan karaa Muwaadiniinta ay ka mid yihiin:-

B- Mujaahidiinta;
T- Dadka aqoonta u leh Cilmiga Boliiska;
J- iyo Aqoonyahanka.

Waxaana lagu xulanayaa Shuruudaha Qodobka 6aad Qaybtiisa 3aad iyo 4aad.

2. Derejada sarkaal Xigeenka waxaa bixinaya Taliyaha Ciidanka markay heer qaran tahay sidoo kale Duqa Magaalada markay tahay heer deegaan, iyadoo laga gudbayn Xadka kutalogalka.

Qodobka 8 (Askarta Ciidanka Boliiska)

1. Askarta Ciidanka Boliiska waxaa loo qorayaa si ikhtiyaari ah (Xor ah) waxaana laga qaadanayaa Muwaadiniinta haysta ama laga heli karo kolba Shuruudaha la cayimo.

2. Askariga waxaa qori kara markay heer Qaran tahay taliyaha Ciidanka, sidoo kale markay tahay heer deegaan waxa qori kara Duqa magaalada, iyadoo laga gudbayn jaangooyada Ciidanka.

3. Taliyaha Ciidanka Boliiska markay heer qaran tahay ama Duqa Magaaladda markay heer deegaan tahay waxaa u banaan inay buuxiyaan meelaha ka banaanaada jaangooyada Ciidanka waqti ka waqti.

Qodobka 9aad (Waajibaadka Ciidanka Boliiska)

1. Waajibaadka Ciidanka waa:-

B. Ilaalinta Nabadgelyada iyo Xasiloonida Dadweynaha.

T. Ilaalinta Nafta, Nabedgelyada Qofka iyo Hantidiisa, iyo isticmaalka xaqa uu Qofka siinayo Sharcigu iyadoon waxba loo dhimin Nabadgelyada Qaranka.

J. Fulinta Sharciyada, Xeerarka Guud iyo kuwa gaar ahaaneed iyo amarada Madaxda.

X. Ka hortagidda, soo sheegidda, Baadhista iyo Qabashada Dembiilayaasha.

Kh. Qabashada Dembiyada la xidhiidha Shuruucda Maaliyadda.

D. Qabashada wixii hawl ah ee ku saabsan Ilaalinta Nabadgelyada ee uu sharcigu farayo Ciidanka Boliiska.

R. U gurmasho iyo u gargaarka dadweynaha haddii ay dhacdo masiibo ama aafo.

S. Lahaanshaha awood Militeri markii looga baahdo ama loogu yeedho difaaca Qaranka.

SH. La socodka iyo dhawrista Diploomaasiyiinta shisheeye, ururada iyo hay'adaha leh dhawrsanaanta (Immunity).

Dh. Fulinta hawlaha Socdaalka ee Dalka (Immigration)

C. Ururinta Wararka Qaranka

G. Ilaalinta, ka hortagga iyo dabagalka basaasiinta Gudaha iyo dibadda.

F .Ciidanka Boliiska deegaanka waxaa xilkiisa u dheer ilaalinta Cashuuraha dawladda Hoose.

2. Xubaha Boliiska, waxaa loo aqoonsna yahay inay si joogto ah u hayaan hawsha, waxaana loo diri karaa meel kasta iyo wakhti kasta si ay u fuliyaan hawlaha loo xilsaaro.

**Qodobka 10 (Hawlaha la shaqeynta hay'adaha ) Garsoorka iyo Xeer ilaalinta**

Sida uu sheegayo Qodobka 8aad ee nidaamka garsoorka, baadhista, raacdaynta iyo Oogista dacwadaha, Boliisku waxay Wakiil u noqonayaan Xeer-ilaaliyaha Guud.

**Qodobka II (Waajibaadka Hawsha gaar ahaaneed)**

1. Haddii uu dhaco dagaal, colaad ama Xaalad kasta oo culus oo deg deg ah, Madaxweynaha ama iyadoo uu soo jeediyey wasiirku ayaa ku amri kara Ciidanka Boliiska inuu qabto hawlo kale oo ka duwan kuwa ku xusan Qodobka 9aad.

2. Haddii ay timaado xaaladda ku xusan qaybta 1aad ee isla Qodobkan, madaxweynaha ayaa amri kara in si ku meel gaadh ah loo kordhiyo jaangooynta Ciidanka Boliiska.

3. Haddii dagaal dhaco, Boliisku wuxuu ka qayb qaadanayaa hawlgelinta Ciidamada Qalabka sida, wuxuuna hoos imanayaa Wasiirka Gaashaandhigga.

**Qodobka 12 (Xidhiidhka Gobollada, Degmooyinka iyo hay'adaha kale ee Dawladda).**

1. Fadhiyada Ciidanka Boliiska ee Gobolada iyo degmooyinku waxay qabanayaan hawlaha la xidhiidha xoojinta nidaamka iyo sugidda nabadgelyada.

2. Ciidanka Boliiska heer qaran waxaa Gobolada iyo degmooyinka uga ah Wakiil Taliyaasha Qaybaha, waxayna xidhiidhiyaan Ciidanka Boliiska heer qaran iyo deegaan. Taliyaha Qaybtu wuxuu wada shaqayn la leeyahay Guddoomiyaha Gobolka, Ciidamada iyo hay'adaha kale ee qaranka.

3. Degmo kastaa waxay lahaanaysaa Saldhig ama Saldhigyo Boliis. Ciidanka ka tirsan Saldhigga Boliiska ayaa ah Ciidanka Boliiska degaanka. Taliyaha Saldhiggu waa Madaxa Ciidanka Boliiska Deegaanka, haddiise ay degmada ku yaaliin hal saldhig in ka badan waxay lahaanayaan Taliyaha Boliiska Deegaanka ee Degmada oo ay hoos immanayaan Taliyayaasha Saldhigyada ee Degmadu.